

# YEEY-CALAAAN BAA HALKAAN KU NOOL

Qeybaha ugu badan Washington, waxaa jira jaansi fiican inay yeey-calaamo ku noolyihiin aaggaaga. Yeey-calaamuhu waxay ka ciyaaraan kaalin muhiim ah nidaamyada bey'ada maxalligaa, sida xakameynta cayayaanka jirka. Annakoo qaadeyna tillaabooyinkaan fudud, waxaan kobcin karnaa bey'ad-wadaagga yeey-calaamada iyo in aan taageerno nabadgelyada iyo noolal-wanaagga duurjoogta iyo dadka.

## HA QUUDIN DUURJOOGTA — SI KAS AH AMA SI KALABA

- Gudaha ku quudi rabaayadaha oo gudaha ku keydi cuntooyinka rabaayadaha.
- Gudaha ku hay haamaha qashinka iyo qashinka la bacramin karo illaa subaxa qaadista; isticmaal haamaha iska-caabinta duurjoogta.
- Nadiifi haraaga cuntada kadib cunta-cunista banaanka.
- Nadiif ka dhig qalabka hilibka lagu shiilo ee bannaanka.
- Xero-geli rasada la-bacramin karo, geedaha miraha, guryaha shinnida, iyo waababka digaag

## ILAALI NABADGELYADA RABAAYADAHHA IYO DUURJOOGTA

- Rabaayadaha xarig ku hay markay bannaanka kula joogaan si looga hortago iskudhac suurtoagal ah.
- Bisadaha gudaha ku hay illaa ay ku jiraan meel bannaan xiran, sida “shabaq” mooyaane.
- Eyda ku ilaali aag xiran, sida guri-ey, ama ilaalintaada ha ku jiraan markii deyr bannaan la joogo.

## HADDII AAD LA KULANTID YEEY-CALAAAN

Waa u caadi in yeey-calaamadu firfircoonaadaan waqti kasta ee maalinta ama habeenka. Waxay sidookale ahaan doonaan kuwa feejigan oo is-ilaaliya—oo waxaa xattaa laga yaabaa inay dabagalaan—rabaayadaha iyo dadka ag-maraya, gaar ahaan markii hooyo yeey-calaan ilmo ku haysato godadkooda.

Haddii aad dareento yeey-calaan inuu aad kuugu soo dhawaanayo adiga ama rabaayaddaada, bajin naxariis leh waa door—samee sharqan dheer adoo gacmaha ku sacabinaya iyo qeylo ama ku tuur shey yar jahadooda si aad ugu dhiirigeliso yeey-calaanku inuu kaa fogaado.

## BEY'AD-WADAAGGU WAA DADAAL BULSHO!

Tilloobooyinkaan waxay ugu waxtar badnaan doonaan markii aan kulligeen wada-shaqeyno. Fadlan iskaashi la samee deriskaaga si aad ugu caawiso bulshadaada in ay yeey-calaamada bey'adda la wadaagto!



Yeey-calaan weyn. Sawir bulsho oo Carnivore Spotter lagula wadaagay [www.carnivorespotter.org](http://www.carnivorespotter.org)

**Deriskaaga la wadaag farriimaha bey'ad wadaagga adoo isticmaalaya xirmada macluumaadka baraha bulshada ee YEEY-CALAAAN BAA HALKAAN KU NOOL!**

